## Si loo helo daryeel caafimaad oo degdeg ah

**Wac 000** ama u tag waaxdaada degdega ah ee kuugu dhow.

## Turjumaada iyo Afcelinta

Fadlan wac 131 450 oo weydii 1800 360 000. Kani waa adeeg bilaash ah.

## Hadalka ama lumista maqal

Waanu aqbalnaa TTY iyo wacitaanka National Relay Service (Adeegga Gudbinta Qaranka) – Help Desk 1800 555 660

## La wadaag ra'yi-celintaada

Waanu qiimaynaynaa ra'yi-celintaada

Iimayl – advice@pcas.org.au

Taleefanka - 1800 360 000

**www.pcas.org.au**

# 1800 360 000

7 subaxnimo-10 galabnimo, todobo maalmood todobaadkii

Adeegga Talobixinta Daryeel Palliative ee Fiktooriya waxa maalgeliya Waaxda Caafimaadka, oo ay maamusho Royal Melbourne Hospital oo ay taageerto Dawladda Fiktooriya.

Si aad u heshid daabacaadan qaab la heli karo wac 1800 360 000, adoo isticmaalaya National Relay Service (Adeegga Gudbinta Qaranka) 13 36 77 haddii loo baahdo, ama iimayl u dir <advice@pcas.org.au>

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Gobolka Victoria, Desembar 2024 (2006731)

# Victorian (Fiktoriyan) Daryeelka Palliative

## Adeegga Talobixinta

# 1800 360 000

7 subaxnimo-10 galabnimo, todobo maalmood todobaadkii

Qof kasta oo ku nool Fiktooriya

Ujeedada daryeelka palliative waa in kor loo qaado tayada nolosha dadka iyo qoysaska la nool jirro nafta xaddidaya.

**Adeeggan Talo-bixinta waxa loogu talagalay qof kasta oo Victoria jooga.**

## Ma la nooshahay cudur nolosha xaddidaya?

## Ma tahay daryeele, xubin qoyskaaga, saaxiib ama deriska qof la nool jirro nafta xaddidaya?

Waxaan ku caawin karnaa su'aalaha sida:

- Sidee bay daryeelka palliative u caawin kartaa qofka aan taageero?
- Halkeen ka heli karaa macluumaadka ku saabsan daryeele?
- Sideen ku helaa adeega daryeelka palliative ee saxda ah?
- Maxaan samayn karaa si aan xanuunkayga u yareeyo? Lalabadayda? Neefsasho la'aantayda?
- Maxaan u baahanahay inaan ka fikiro iyo in aan u qorsheeyo?
- Sideen ugala hadlaa bixiyahayga daryeelka caafimaadka daryeelka palliative?

## Ma tahay dhakhtar, kalkaaliye caafimaad ama bixiye kale oo daryeel caafimaad oo daryeelaya qof qaba jirro nafta xaddidaysa?

Kalkaaliyahayaga daryeelka palliative ee takhasuska leh ama dhakhtarka ayaa kaa caawin kara arrimaha sida:

- Maareynta calaamadaha
- Qorista dawooyinka
- U beddelashada daawooyinka afka laga qaato oo la isku duro
- Faleebooyinka subcutaneous ee joogtada ah (siriinjiyada ka xeeya dawada, (syringe drivers))
- Go'aan gaadhista iyo qorsheynta daryeelka hore.

Ma awoodno inaan bixino warqadaha dawooyinka, tixraacyada, helitaanka diiwaannada caafimaadka ama beddelka daryeel bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka maxalliga ah.

**1800 360 000**
7 subaxnimo-10 galabnimo, todobo maalmood todobaadkii

OO XOR AH OO QARSOON AH
**www.pcas.org.au**